# Xaashida Macluumaadka Ka qaybqaataha Qaangaarka ah (Da'da 16+) V8

# 03.10.20

*Xaashidan macluumaadka waxaa loo kala saaray labo qaybood.*
*Qaybta 1 waxaa ku faahfaahsan waxa ay daraasaddu ka kooban tahay iyo sida aan u isticmaali doonno macluumaadka iyo muunadaha la guro.*
*Qaybta 2 waxaa ku qeexan Su'aalaha Badi La Is Weydiiyo*

## Qaybta 1

## Maxay ka kooban tahay?

### Daraasadda 1) Ka warbixinta cudurrada ee internetka iyo macluumaadka kale

Tallaabada koowaad waxaa lagu buuxinayaa **sahaminta diiwaangelinta iyo oggolaanshaha internetka** oo dhammaan dadka qaangaarka ah ee qoyska ka mid ah u suurtogelinaysa in ay xaqiijiyaan in ay ku faraxsan yihiin in ay ka qayb qaataan Ilaalada Fayruska (Virus Watch) iyo in ay ku faraxsan yihiin in carruurta ay daryeelaan ay ka qayb qaataan. Carruurta joogta da' ay ku go'aan gaaraan ayaa weliba la weydiin doonaa in ay caddeeyaan in ay oggol yihiin. Haddii ay carruuri aqalka joogto fadlan iyaga la eeg xaashida macluumaadka carruurta. Buuxinta sahaminta diiwaangelinta iyo oggolaanshuhu waxay qiyaas ahaan 5 daqiiqo ku qaadan doontaa qof walboo reerka ka mid ah. Fadlan hubi in aad soo diyaarisay magaca iyo cinwaanka xafiiska Takhtarka Guud (GP) ee qof walba ka hor inta aadan iska qaadin sahaminta iyo, haddii aad heli karto, lambarka NHS ee qof walba. Lambarka NHS waxuu ku yaallaa inta ugu badan waraaqaha ka yimid adeegga NHS (Adeegga Caafimaadka Qaran).

Islamarka ka dambaysa buuxinta sahaminta diiwaangelinta hoggaamiyaha reerka ee Ilaalada Fayruska ayaa xubnaha reerka ka caawin doona in ay buuxiyaan **xogwaraysiyada salka aasaasiga ah ee internetka** oo daboolaya su'aalaha ku saabsan da'da, jinsiga, jinsiyadda, waddanka lagu dhashay, shaqada, dhaqaalaha, xaaladaha caafimaadeed ee dabadheeraadka ah, daawooyinka, xiriirka hore loola yeeshay qof qaba cudurka COVID-19, calaamadihii hore ee laga yaabo in ay ahaayeen cudurka COVID-19 iyo habdhaqannada sida kala fogaynta dadka iyo nadaafadda gacmaha. Waxay tani xubin kastoo reerka ka mid ah ku qaadan doontaa

qiyaas ahaan 20 daqiiqo. Fadlan hubi in aad diiwaangeliso ama qorto dhererka iyo culayska qaangaarka haddii aad garanayso. Haddii aadan tan garanayn fadlan isticmaal sawirrada ku yaalla dhammaadka Su'aalaha Badi La Is Weydiiyo si aad u doorato qaybta qaabka jirkaaga oo tan meel ku qoro.

**Diiwaangelinta toddobaad walba ee cudurrada oo dhan -** Waqti kastoo qof aqalkaaga ka mid ah uu buko ama jirran yahay oo uu qabo qufac iyo hargab ama calaamado kaloo cudur oo kaladuwan oo noqon kara cudurka COVID, waxuu qofkaasi u baahan doonaa in uu qoro calaamadihiisa cudur (xataa heerkulka jirkiisa haddii aad haysato heerkulbeeg) maalin walba ee uu buko (waxaan annagu bixin doonnaa buug xasuusqor tan lagu caawiyo). Waxay tani qaadan doontaa in ka yar shan daqiiqo maalin kastoo uu qof buko. Hoggaamiyaha reerka Ilaalada Fayruska ayaa toddobaad kaste heli doona iimayl lagu weydiinayo in uu sheego haddii qof bukay iyo haddii kale. Haddii jawaabtu ay tahay “maya” halkaas ayuu xogwaraysigu ku dhammaanayaa, markaa inta ugu badan waxay tani qaadan doontaa oo keliya in ka yar hal daqiiqo si loo jawaabo toddobaad kaste. Haddii jawaabtu ay tahay haa, hoggaamiyaha reerka Ilaalada Fayruska ayaa la weydiin doonaa in uu sahamin internet ku diiwaangeliyo calaamadaha cudur ee qof kaste oo bukay, haddii cudurkan laga daaweeyey iyo waxa aqalka dhexdiisa lagu sameeyey si caabuqa loogu diido in uu faafo iyo xoogaa su'aalood oo ku saabsan waxa ay sameeyeen xubnaha qaangaarka ah ee reerka ka mid ah toddobaadkii ka horreeyey cudurka ama jirrada. Waxay su'aalahani qaadan doonaan qiyaas ahaan toban daqiiqo si uu u buuxiyo qof kaste oo buka ama jirran.

**Sahaminta bil walba ee habdhaqannada iyo saamaynta xadaymaha cudurka COVID-19**

Waxaan annagu rabnaa in aan fahanno sida ay dadku uga jawaab celiyaan talada dawladda ee ku saabsan cudurka COVID-19 iyo sida ay taladani u saamaynayso noloshooda. Maadaama ay taladani is beddeli doonto inta daraasadda lagu gudo jiro, waxaan annagu qorshaynaynaa sahamin internetka lagu sameeyo bil walba si tan loo qiimeeyo. Waxay tani su'aalo ka jeedin doontaa haddii sahaminnada qaar la seegay ama laga tagay, haddii qof uu isbitaalka tagay, su'aalaha ku saabsan kala fogaynta dadka, haddii adiga lagu weydiiyey in aad is go'doomiso ka dib xiriir aad la yeelatay ama ugu dhawaatay qof cudurka lagu xaqiijiyey ama loogu tuhunsan yahay, haddii aad telefoonkaaga ku isticmaasho abb-ka ama barnaamijka adeegga NHS ee lagu raadiyo xiriirka, haddii adiga lagaa baaray cudurka COVID ama unugyada difaaca jirka ee COVID. Waxaa jiri doona su'aalo ku saabsan shaqadaada si loo eego saamaynta ay talada cudurka COVID adiga kuu keento. Waxuu xogwaraysigani xubin kastoo reerka ka mid ah ku qaadan doonaa qiyaas ahaan 15 daqiiqo.

Waxaan annagu rabnaa in Ka qaybqaateyaasha Ilaalada Fayrusku ay noo soo sheegaan su'aalaha iyaga muhiim u ah. Marka ay na caawiyaan tobaneeye kun oo adiga kaala qayb qaata, waxaan gargaar ka bixin karnaa in su'aalahan laga jawaabo. Fadlan qor su'aal aad rabto in aan annagu isku dayno in aan ka jawaabno, waxaan mar kale ku weydiin doonnaa bil kaste. Waxaan wada akhrin doonnaa

jawaabahaaga waxaanan kuu suurtogelin doonnaa in aad bil kaste ka cod bixiso su'aal lagu daro sahamintayada bil walba taasoo ku salaysan talooyinka ka qaybqaateyaasha. Waxaa kuwan ka mid noqon kara wax kastoo aad u aragto in uu muhiim yahay matalan haddii aad u aragto in waxyaabaha qaarkood ay raad ku yeelan karaan halista aad ugu jirto cudurka COVID-19 ama ay adiga kaas kaa ilaalin karaan ama haddii aad ka walwal qabto saamaynta nidaamyada xakamaynta waxaan isticmaali karnaa sahaminnada si aan iskugu dayno in aan wax dheeraad ah ka ogaanno. Annaga kama jawaabi karno su'aalaha dhammaantood laakiin sida ugu fiican ayaan ugu dadaalnaa! Waxaan weliba soo saari doonnaa warside joogto ah oo loogu dadaalo in lagaga jawaabo su'aalo caadi ah oo ay soo jeediyaan ka qaybqaateyaasha Ilaalada Fayrusku.

### Daraasadda 2 - Falanqaynta Diiwaannada Caafimaadeed

Waxaan rabnaa in aan dib u eegno diiwaannadaada caafimaadeed si aan u soo ogaanno booqashooyinka isbitaalka ee laga yaabo in ay xiriir ku lahaayeen fayrusyada neefsashada iyo dadka reerka ka dhintay tan iyo bishii Jannaayo 2020, inta ay daraasaddu socoto iyo 5ta sano ee ka dambeeya dhammaadka daraasadda. Waxaa tan sabab u ah in ay dhici karto in cudurka COVID-19 uu wareego sanado farabadan waxaanan rabnaa in aan fahanno haddii caabuqa sanadkani uu dadka ka dhawro cudurrada sanadaha soo socda. Waxaa weliba dhici karta in cudurka COVID-19 uu keeno cudurro waqti dheer oo lama filaan ah waxaanan rabnaa in ay noo suurtogasho in aan taas ogaanno haddii ay dhacdo. Ururka NHS Digital waxuu hayaa xogta ku saabsan booqashooyinka iyo jiifimaha isbitaalka (oo lagu magacaabo xogta Tirakoobka Dhacdooyinka Isbitaalka) iyo dhimashooyinka, waxuuna ururka Caafimaadka Dadweynaha ee England hayaa xogta baaritaanka fayruska ee si caadi ah loo guro ee uu sameeyo adeegga NHS. Waxaan weliba rabnaa in ay noo suurtogasho in aan isku xirno xogta ku jirta barnaamijka Baarista iyo Raadinta xataa natiijooyinka cudurka lagu helo ee tan ka soo baxa. Waxaan ururrada NHS Digital iyo Caafimaadka Dadweynaha ee England (Public Health England) (PHE) u sheegi doonnaa magaacda, taariikhaha dhalashada, jinsiga, cinwaannada, iyo, marka la hayo, lambarrada adeegga NHS ee Ka qaybqaateyaasha Ilaalada Fayruska. Ururrada NHS Digital iyo PHE waxay soo celin doonaan macluumaadka ku saabsan booqashooyinka, jiifimaha isbitaalka ama dhimashooyinka ee reerka khuseeya. Waxaa xogtan lagu xiri doonaa Qaybta xogta Ilaalada Fayruska ka hor inta aanan laga saarin waxyaabaha dadka lagu garto si dadka xogta falanqaynaya aanay ugu suurtogelin in ay gartaan ka qaybqaateyaasha.

### Daraasadda 3 - Daraasadda suuf marinta si loo garto haddii dadku ay qaadeen cudurka COVID-19

Reerkaaga ayaa **loo dooran karaa** in uu qayb ka noqdo koox yar oo ka kooban ka qaybqaateyaasha Ilaalada Fayruska oo aan baarno si aan u ogaanno haddii uu ku galay caabuqa cudurka COVID-19 (ama caabuq nooc kale ah) marka aad la kulanto cudur neefsasho. Waxaan tan ku samaynaa baaritaan aan ka qaadno **suufafka la**

**mariyo sankaaga iyo cunahaaga.** Haddii aan adiga kaa martiqaadno in aad ka qayb qaadato, waxaan u baahan doonnaa in dhammaan dadka reerka ka mid ahi ay oggolaadaan in ay soo diraan suufafka la mariyo sanka/cunaha. Bilowga daraasadda, waxaan kuu soo diri doonnaa **baakadka reerka** oo ay ku jiraan suufaf la mariyo sanka iyo cunaha. Maadaama ay suufafku nagu yar yihiin waxaa dhici karta in aan kuwan qaar kale ka soo dirno waqti dambe. Fadlan kuwan ku hay meel yara qabow oo engegsan ilaa aad diyaar u tahay in aad isticmaasho. Waxaa la socon doona tilmaamo- adiga laftigaaga ayaa suufka is marin kara ama qof qoyska ka mid ah ayaad weydiisan kartaa in uu taas kuu sameeyo. Iska qaadista muunadda ama qaybtu ma adka mana leh xanuun. Waxaan ku siin doonnaa dhammaan baakadyada aad u baahan tahay si aad bilaash noogu soo celiso boostada iyadoo ay ugu fiican tahay isla maalinta ama maalinta ku xigta iska qaadista muunadda. Waxaan kuu soo diri doonnaa suufaf beddel ah si aad marwalba qaar ugu haysato guriga muddada daraasadda.

**Reerkaaga ayaa la weydiin karaa in uu ku biiro mid ka mid ah saddexda koox ee soo socda:**

**KOOXDA 1:** Dir suuf la mariyo sanka/cunaha mar kastoo aad 2 maalmood oo isku xiga yeelato mid ka mid ah calaamadaha cudur ee soo socda: xummad ama qandho, ama qufac, ama luminta/isbeddelka dareenka urta ama dhadhanka, neeftuurid, ama dhego xanuun, ama cune xanuun, ama hindhiso, ama san cabburan, ama san dareeraya, ama hinraag.
**Kooxdani waxay noo suurtogelin doonaan in aan la soconno inta jeer ee uu cudurka COVID-19 dadka ku bilaabmo.**

**KOOXDA 2:** Dir suuf la mariyo sanka/cunaha mar kastoo aad la kulanto cudur ama jirro cusub oo ay ka mid tahay:

- Ama - laba maalmood oo isku xiga oo aad yeelato calaamadaha cudurka neefsashada (matalan qufac, neeftuurid, cune xanuun, san dareeraya, san cabburan, hindshiso, luminta ama isbeddelka dareenka dhadhanka ama dareenka urta).
- AMA – laba maalmood oo isku xiga oo aad yeelato calaamadaha cudurka ee caloosha iyo mindhicirka (matalan shuban/saxaro dabacsan, calool xanuun, lallabo ama matagid, diidista cuntada).
- AMA - laba maalmood oo isku xiga oo aad yeelato calaamadaha caabuqa guud (matalan dareenka xummadda ama qandhada, lahaanshaha heerkul sarreeya, dareennada daal xun oo aanan sabab lahayn, damqashada guud ee muruqyada ama kalagoysyada jirka)

**Kooxdani waxay noo suurtogelin doonaan in aan ogaanno haddii qeexitaannada ama sharraxaadyada lagu tilmaamo kiisaska qaran lagu soo helo kiisaska intooda ugu badan ama haddii loo baahan yahay in lagu daro calaamado kaloo cudur.**

**KOOXDA 3:** Dir suuf la mariyo sanka/cunaha mar kastoo aad 2 maalmood oo isku xiga yeelato xummad ama qandho AMA qufac AMA luminta/isbeddelka dareenka urta ama dhadhanka. Waxaan weliba rabnaa in reerka oo dhan ay suufka is mariyaan isla maalintaas. Haddii adiga ama qof reerkaaga ka mid ah

aad heshaan natiijo baaritaan oo cudurka lagu helo, waxaan rabnaa in aad dhammaantiin isk marisaan suufka maalinta natiijada iyo 7 maalmood ka dib. Waxay tani annaga macluumaad muhiim ah naga siin doontaa faafista cudurka COVID-19 ka hor inta aanay calaamadaha cudur soo bixin, iyo weliba caabuqa aanan calaamado lahayn.

**Kooxdani waxay noo suurtogelin doonaan in aan fahanno sida fudud ee uu cudurka COVID-19 ugu faafo dadka kale ee reerka ka mid ah, ahmiyadda caabuqa aanan calaamado lahayn iyo dhalashada unugyada difaaca jirka ka dib marka caabuqa la qaado ama loo feydmo ama loo dhawaado caabuqa.**

**Maxaa ku dhacaya ama lagu samaynayaa muunadaha iyo natiijooyinka baaritaanka?**

UCLH iyo shaybaarka Health Services Laboratory ayaa la shaqaynaya machadka Francis Crick Institute si ay u kordhiyaan tirada baaritaannada la samayn karo, waxaana muunadaha lagaga shaqayn doonaa wada shaqayntan. Waxaan annagu cudurka COVID-19 ka baari doonnaa muunadaha lagu soo qaado suufafka islamarka ay noo suurtogasho waxaanan ku soo ogaysiin doonnaa natiijooyinkaaga. Hase yeeshee, waxaa muhiim ah in la garto in natiijooyinka aanan loo soo deddejin doonin sida suufafka loo qaado sababaha daawaynta ama caafimaadka dadweynaha. Sidoo kale, suufafka ay iska qaadaan ka qaybqaateyaasha ayaa laga yaabaa in ay xoogaa ka qaldanaadaan suufafka ay qaadaan shaqaalaha daryeelka caafimaadku - markaa waxay seegi karaan ama dhaafi karaan caabuqyada qaarkood. Sababahan awgood waxaa aad muhiim u ah in la fahmo in **Suufafka Ilaalada Fayrusku aanay beddelayn suufafka uu adiga kuugu deeqo adeegga NHS**. **Fadlan raac talada caadiga ah ee daawaynta (NHS) ama caafimaadka dadweynaha ee khusaysa baaritaanka taasoo siyaado ku ah suufafka lagu bixiyo daraasadda Ilaalada Fayruska**.

Natiijooyinka waxaa adiga laguugu soo celin doonaa farriin teksti ah iyo/ama iimayl. Waxaad eegan kartaa macluumaadka caadiga ah ee ugu dambeeyey ee ku jira bartayada internetka taasoo lagu sharxayo waxa ay ka dhigan tahay natiijada baaritaanku laguna bixinayo taladii ugu dambaysay ee ku saabsan waxa habboon in aad samayso. Waxaa annaga sharci ahaan waajib nagu ah in aan Caafimaadka Dadweynaha ee England ka wargelinno natiijooyinka baaritaanka ee lagu helo cudurka COVID-19. Waxaa tan lagu samayn doonaa isla nidaamka otomaatigga ah ee loo isticmaalo si muunadaha cudurka laga helo looga warbixiyo ee lagaga shaqeeyo adeegga NHS gudihiisa.

Marka suuf laga helo cudurka COVID-19, waxaan qaban doonnaa nidaamaynta hiddesidaha fayruska. Waxay tani annaga noo suurtogelinaysaa in aan aragno koodka hiddesidaha buuxa ee fayruska taasoo muhiim u noqon doonta si loo fahmo haddii noocyada fayruska qaarkood ay dadku siyaado ugu bukoodaan. Marka in ka badan hal qof oo reerka mid ah ay la bukoodaan cudurka COVID-19 baaritaankan hiddesidaha fayruska ayaa naga caawin doona in aan fahanno haddii hal qof uu qofka kale qaadsiiyey caabuqa ama haddii caabuqyadu ay ka soo gudbeen reerka

dibaddiisa. Annagu natiijooyinkan adiga dib kuuguma soo diri doonno maxaa yeelay waxaa adkaan karta in natiijooyinka laga macne qaato mana beddelayaan daryeelkaaga.

Ka sokow baaritaanka muunadaha lagaga baaro cudurka COVID-19, waxaa muunadaha loo kaydin doonaa si goor dambe looga baaro ama looga falanqeeyo caabuqyada kalee neefsashada ee keena hargabka ama cudurka u eeg ifilada sida Rhinofayrus, koronafayruska xilliyeed iyo influenza. Maadaama kuwan la baari doono oo keliya dhammaadka daraasadda annagu natiijooyinkan dib uma soo diri doonno.

**Daraasadda 4 - Daraasadda Difaaca dabiiciga ah si loo soo ogaado haddii dadku ay difaaca dabiiciga ah ka dhisteen cudurka COVID-19**

Haddii reerkaaga loo doortay in uu ka qayb qaato mid ka mid ah kooxaha daraasadda suuf marinta ee kor ku faahfaahsan, waxaan weliba rabnaa in aad ka qayb qaadato daraasadda difaaca dabiiciga ah ee laga qabo cudurka COVID-19 iyo caabuqyada kalee neefsashada ee caadiga ah. Waxaa aad muhiim u ah in aan annagu fahanno tirada dadka uu galay cudurka COVID-19 iyo haddii caabuqu uu keeno difaaca dabiiciga ah ee badbaadin leh ee dadka u diidi kara in ay mar kale caabuqa qaadaan. Si aan tan u samayno waxaan u baahan nahay in aan qaadno qiyaaso yar yar oo dhiig ah (oo la mid ah marka uu takhtarkaagu ku weydiiyo in aad iska soo qaaddo baaritaanka dhiigga). Dhiiggan waxaa laga baaraa unugyada difaaca ku toosan cudurka COVID-19 iyo weliba dhinacyada kalee ka mid ah jawaabcelinta difaaca dabiiciga ah.

Inta lagu jiro xilliga dayrta ee 2020 iyo guga/xagaaga ee 2021, waxaan ka qaybqaateyaasha ugu baaqi doonnaa in ay tagaan kiliniig ama rug caafimaad oo u dhow halkaasoo kalkaaliye caafimaad, takhtar ama dhiig qaade (xirfadle takhasus u leh qaadista dhiigga) oo la tababbaray uu muunadaha ama qaybaha dhiigga kaga qaadi doono dadka qaangaarka ah iyo carruurta oggolaada.

**Dhiig intee leeg?**

Dadka qaangaarka ah (16 jir ama ka weyn) - 30 ml (2 x 5ml, 2 x 10ml dhalooyin u dhigma ilaa 6 qaaddo yar),
Carruurta 15 jir ah ama ka yar waxaan ka qaadi doonnaa 15 ml (1 x 5ml, 1 x 10ml dhalooyin – u dhiganta ilaa 3 qaaddo yar).

Dadka dhiigga ka qaadaya carruurta waxaa loo tababbaray oo ay khibrad u leeyihiin tan samaynteeda. Waxaan annagu bixin doonnaa boomaato suuxin kooban si dareenka looga saari karo goobta si loo yareeyo raaxo darrada.

Waxaan rabnaa in dhammaan xubnaha reerka ka mid ahi ay yimaaddaan oo iyaga dhiigga laga qaado isla waqti keliya (marka suurogal ah) waxaanan adiga ku siin doonnaa fowshar ama tigidh wax lagaga iibsado internetka si aan kaaga magdhawno kharashka safarkaaga (fadlan iimayl u dir viruswatch@ucl.ac.uk). **Carruurta 15 jir ah ama ka yar waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay muunad dhiig bixiyaan ama dhiigga**

**laga qaado laakiin waxay daraasadda ka qayb qaadan karaan xataa haddii aanay rabin in muunad dhiig laga qaado.** Baaritaannada unugyada difaaca jirka ee farta lagu mudo ayaan weliba ugu baaqi doonnaa carruurta aanan rabin in muunad dhiig laga qaado ama haddii kiliniigga iyaga dhiigga ka qaadaya uusan joogin qof shaqaalaha ka mid ah oo loo tababbaray qaadista dhiigga carruurta. Waxaa sidan dhibic dhiig loogu ridaa warqad yar oo ku jirta qalabka baaritaanka. Baaritaannada habkan lagu sameeyo waxaa laga yaabaa in aanay sax u ahayn sida muunadda dhiigga ee buuxda laakiin waxaa haddana laga heli doonaa macluumaad qiime leh. Baaritaannada unugyada difaaca jirka ee farta lagu mudo ayaa weliba loogu baaqi doonaa qofka qaangaarka ah ee aanan annagu ka soo saari karin qayb ama muunad dhiig.

**Haddii aad ku jirto mid ka mid ah kooxaha hoos ku taxan kalkaaliye caafimaad, takhtar ama dhiig qaade (xirfadle takhasus u leh qaadista dhiigga) oo la tababbaray ayaa kuugu baaqi doona inuu aqalkaaga yimaaddo si uu kaaga qaado muunadaha dhiigga.** Haddii aad ka jeceshahay waxaad weliba dooran kartaa in aad baabuur ku tagto kiliniigga waxaanan annagu hubin karnaa in aadan wax xiriir ah la yeelanin ama ugu dhawaanin qof aanan ahayn qofka muunadda dhiigga qaadaya goorta booqashada. Qofka muunadda ama qaybta dhiigga qaadaya ma yeelan doono calaamadaha cudurka COVID-19 waxuuna xirnaan doonaa Qalabka Badbaadinta Jirka oo ay ku jirto maaskarada wajigu si loo hubiyo in adiga marwalba lagu dhawro ama lagu badbaadiyo.

- 70 jir ama ka weyn (iyadoo aanan la eegayn xaaladaha caafimaadeed)
- ka yar 70 jir oo qaba xaalad caafimaad oo dahsoon oo ku taxan halkan hoose (matalan qof kastoo lagu amar siiyo in uu helo mudista ama tallaalka ifilada isagoo qaangaar ah sanad kaste sababo caafimaadeed awgood):
- cudurrada neefsashada ee dabadheeraadka ah (waqti dheer) ee sahlan ilaa meeldhexaad ah, sida cudurka neefta ama naqaska, cudurka xiranka sanbabbada ee dabadheeraadka ah (chronic obstructive pulmonary disease) (COPD), cudurka neeftuuridda ee emphysema ama boronkiitada,
- cudurka wadnaha ee dabadheeraadka ah, sida hawlgabka wadnaha
- cudurka kelyaha ee dabadheeraadka ah
- cudurka beerka ee dabadheeraadka ah, sida cagaarshowga
- xaaladaha caafimaadka ee neerfaha ee dabadheeraadka ah, sida cudurka Parkinson’s, cudurka daciifka muruyqada (motor neurone disease), cudurka dareeme abbaarka (multiple sclerosis) (MS), naafonimo waxbarasho ama cudurka dhaqdhaqaaqa jirka ee cerebral palsy
- cudurka macaanka ama sonkorowga
- nidaamka difaaca dabiiciga ah ee daciifsan sababtoo ah xaaladaha caafimaadka sida fayruska HIV iyo cudurka AIDS, ama daawooyinka sida kiniinnada istiiroodiska

- culayska xad dhaaf badan (cabbirka culayska iyo dhererka jirka (body mass index) (BMI) ee 40 ah ama ka sarreeya)
- dadka uurka leh

Haddii aad ku jirto mid ka mid ah qaybaha soo socda, waxay tahay in aad warqad ka heshay Takhtarka Guud taasoo laguugu sheegayo in aad adigu **aad iyo aad ugu nugushahay** cudurka COVID-19 oo lagugu weydiinayo in aad gabbaad ku jirto si aad uga hortagto caabuqa. Haddii aad kooxdan ku jirto, **annagu kaama codsan doonno in aad iska qaaddo muunadda dhiigga,** laakiin waxaa dhici karta in aan ku weydiinno in aad iska qaaddo baaritaanka unugyada difaaca jirka ee farta lagu mudo.

- dadka qaba cudurka kansarka ee loo sameeyo daawaynta kiimikeed ee firfircoon ama daawaynta shucaaca
- dadka lagu tallaalay xubin jir ee weli qaata daawooyinka cabburinta nidaamka difaaca dabiiciga ah
- dadka qaba cudurrada kansarka ee dhiigga ama dhuuxa lafta sida cudurka dhiig caddaadka (leukaemia) ee marxalad kaste kaga jira daawaynta
- dadka qaba xaaladaha caafimaadka ee xabadka ama shafka ee daran sida cudurka adkaanta neefta iyo dheefshiidka (cystic fibrosis) ama cudurka neefta ama naqaska ee daran (ee u baahan jiifimaha isbitaalka ama qaadashada kiniinnada istiiroodiska)
- dadka qaba cudurrada daran ee nidaamyada jirka, sida cudurka kelyaha ee daran (sifaynta dhiigga (dialysis))

**Daraasadda Farta lagu Mudo ee lagu baaro difaaca dabiiciga ah ee laga qabo cudurka COVID-19 waqti ka dib**

Waxaan annagu weliba danaynaynaa in aan fahanno sida difaaca dabiiciga ah ee aan ka qabno cudurka COVID-19 uu hoos ugu dhici karo waqti ka dib. Koox ay ka kooban yihiin reero aanan ka qayb qaadanin daraasadda suuf marinta, ayaa laga marti qaadi doonaa in ay guriga iskaga qaadaan baaritaanka unugyada difaaca jirka ee farta lagu mudo xilliga dayrta ee sanadka 2020 iyo mar labaad guga sanadka 2021.

Haddii reerkaaga la doortay in uu ka qayb qaato **Kooxda Saddexaad ee daraasadda suuf marinta**, waxaan codsan doonnaa in dhammaan xubnaha reerku ay iska qaadaan baaritaanka unugyada difaaca jirka ee farta lagu mudo isla waqtiga lagaa qaadayo dhiigga (dayrta 2020), iyo 14 maalmood ka dib marka qof kastoo reerkaaga ka mid ah natiijada baaritaanka ee lagu helo cudurka COVID-19 laga siiyo suufkooda la mariyey sanka/cunaha. Qalabka baaritaanka unugyada difaaca jirka ee farta lagu mudo ayaa lagu bixin doonaa baakadyada reerkaaga iyadoo ay la socdaan tilmaamo iyo isuxire lagu gaaro fiidiyow soo bandhigis ah. Waxaad u baahan doontaa in aad sawir ka qaaddo baaritaankaaga oo aad UCL ugu rarto cinwaan internet oo sugan ama amni leh oo aan annagu bixin doonno.

**Maxaa ku dhacaya ama lagu samaynayaa muunadaha dhiigga iyo natiijooyinka baaritaanka?**

Machadka Francis Crick Institute ayaa muunadaha ama qaybaha dhiigga ka falanqayn doona jawaabcelinta difaaca dabiiciga ah ee jirka iyo u nuglaanta cudurka COVID-19. Su'aalaha ugu muhiimsan ee aanan iminka la ogayn waxaa ka mid ah tirada dadka hore u qaaday caabuqa COVID-19. Muunadahaaga ayaa annaga muhiim noo noqon doona si aan tan jawaabteeda uga ogaanno qaybaha kaladuwan ee waddanka iyo kooxaha kaladuwan ee dadka.

Waxaa laga yaabaa in aad hore u maqashay baaritaannada unugyada difaaca jirka ee loogu talagalay cudurka COVID-19 iyo in kuwan loo isticmaali karo si dadka loo siiyo shahaadooyinka "difaaca dabiiciga ah". Waqtiga xaadirka ah wax ku filan lagama garanayo cudurka COVID-19 si loogu kalsooni qabo in baaritaanka cudurka lagu helo uu kuu keenayo in aad ka difaacan tahay caabuqa mustaqbalka. Sidoo kale, dadka qaaday caabuqa COVID-19 ee ay ku yar yihiin unugyada difaaca jirka ayaa laga yaabaa in baaritaankooda lagu waayo cudurka. Waxaa weli laga shaqaynayaa in la qiimeeyo baaritaannada unugyada difaaca jirka ee ugu saxsan waxayna muunadahaagu caawin doonaan shaqadan. Marka natiijooyinka baaritaankaaga (ee laga helo muunaddaada dhiigga ee buuxda) ay diyaar noqdaan, kuwan ayaan dib kuugu soo diri doonnaa waxaanan kuu soo raacin doonnaa macluumaadka ku salaysan caddaynta ama daliilka ugu fiican ee la hayo si lagaaga caawiyo in aad ka macne qaadato natiijooyinka.

Waxaa muunadaha loo kaydin doonaa si goor dambe looga baaro jawaabcelinta difaaca dabiiciga ah ee jirka iyo u nuglaanta caabuqyada kalee neefsashada ee caadiga ah ee keena hargabka iyo cudurka u eeg ifilada sida Rhinofayrus, koronafayruska xilliyeed iyo influenza. Muunadaha looma isticmaali doono caabuqyada aanan ahayn kuwa keena cudurka ama jirrada neefsashada.

Jirkeenu waxuu soo saaraa kumanaan farabadan ee borotiin waxaana kuwaas naqshadahooda go'aamiya hiddesideyaasheena iyo deegaankeena. Waxaa cilmibaaris lagu muujiyey in qiyaas ahaan 5000 oo ka mid ah borotiinnadani ay la xiriiraan haddii ay dadku cudurro qaadaan iyo haddii kale. Baaritaannada casriga ah ayaa isticmaali kara muunadaha dhiigga si loogu baaro borotiinnadan dhammaantood. Tan fahankeeda ayaa tilmaamo ka bixin kara sida dadka looga ilaaliyo cudurrada oo loogu soo saaro daawayno cusub. Cilmibaarista noocan ah waxa lagu magacaabaa cilmibaarista "Proteomics" ee borotiinnada. Hal ka mid ah muunadaha ama qaybaha dhiigga ayaa loo kaydin doonaa cilmibaarista noocan ah si loogu isticmaali karo in la fahmo sababta dadka qaarkood u qaadaan cudur daran marka uu galo caabuqa COVID-19 ee aanay dad kale u qaadin. Natiijooyinka ka soo baxa baaritaannadan adiga dib **laguuguma** soo diri doono.

**Daraasadda 5) Raadraacidda Dhaqdhaqaaqyada- si aan u fahmi karno sida ay dhaqdhaqaaqyada dadka ee aqalka dibaddiisu ay u saameeyaan halista ay u galaan qaadista cudurka COVID-19**

Waxaan rabnaa in aan baarno ama darasno xogta dhaqdhaqaaqyada waqtiga aad u socsocoto waxqabadyadaada caadiga ah. Ka qaybqaateyaasha qaangaarka ah waxaa loogu baaqi doonaa in ay telefoonkooda ku soo dejistaan Abb-ka ama barnaamijka telefoonka gacanta ee bilaashka ah ee lagu raad raaco dhaqdhaqaaqyada ee lagu magacaabo “Tracker for ArcGIS”. Abb-kani waxuu diiwaangeliyaa goobta telefoonnada gacanta waxuuna ku daaran yahay dhanka

dambe waxuuna isticmaalaa tilmaamaha GPS ee telefoonka iyo u dhawaanshaha goobaha internetka bilaa xarig ah ee wi-fi iyo nidaamka bulutuuf. Waxaa loogu nidaamiyey si uu u isticmaalo qiyaasta baatariga ee ugu yar waxaana loo hagaajiyey in uu xogta gudbiyo marka aad ku xiran tahay shabakadda ama khadka wi-fi markaa ma isticmaalo qiyaasaha xogta ee loo oggol yahay telefoonkaaga.

Xogtu waxay annaga noo suurtogelin doontaa in aan si fiican u fahanno inta ay talada ku saabsan kala fogaynta dadku saamayso ama wax ka beddesho dhaqdhaqaaqyada dadka. Waxaan weliba xogta u isticmaali doonnaa si aan u fahanno inta ay dadku joogeen bannaanada dadweynaha u furan toddobaadka ka horreeya tirada caabuqyada marka loo eego waqtiyada kale. Waxay tani annaga noo suurtogelin doontaa in aan fahanno nooca waxqabadyada (matalan tagidda shaqada, dukaannada, masraxyada, shaneemooyinka, goobaha sboortiga ee ballaaran, meelaha dalxiiska, baarasha, kalaabyada, makhaayadaha yar yar & makhaayadaha waaweyn, iyagoo isticmaala gaadiidka dadweynaha, ama jimicsi sameeya) ee kordhiya halista caabuqa. Macluumaadku waxay weliba annaga naga caawin doonaan in aan fahanno haddii dadka shaqadooda ugu baahan in ay aqalka in badan ka baxaan ay halis dheeraad ah ugu jiraan caabuqa. Waxaan weliba danaynaynaa in aan eegno heerarka u feydanka ama u dhawaanshaha wasakhda cimilada iyo isbeddellada cimilada. Ugu dambayn, waxaan danaynaynaa in aan eegno haddii dadka iyo xiriirrada ay ku leeyihiin reerkoodu ay guriga joogaan marka ay bukaan ama jirran yihiin.

Si aan uga jawaabi karno su'aalahan waxaan rabnaa in ka qaybqaateyaashu ay abb-ka ku dhaafaan xaaladda “On” ama daaran muddada daraasadda (12 bilood), hase yeeshee, waxaad maamuli kartaa badhanka daarista iyo daminta. Dhammaadka daraasadda, waxaan adiga kuu soo diri doonnaa xasuusin si aad kaas uga saari karto telefoonkaaga.

Waxaan garanaynaa in xogta dhaqdhaqaaqyadu ay sir badan tahay oo, isla sida dhammaan xogta kale ee aan adiga kaa soo gurno waxaan u hubin doonnaa dhawritaanka badbaadada xogta ee ugu sarreeya inta suurogalka ah. Haddii aad doorato in aad ka qayb qaadato daraasadda raadraacidda dhaqdhaqaaqyada, kooxda daraasadda UCL ayaa macluumaadkaaga bogga ama akownka isticmaalaha (magaca koowaad, magaca qoyska iyo cinwaanka iimayl) ku rari doonta rukumashada internetka ee ArcGIS (oo lagu hayo kaydiye Waqooyi Maraykan) si loogu habeeyo akownkaaga ama boggaaga abb-ka raadraacidda. Kooxda daraasadda UCL ayaa markaa adiga kuu soo diri doonta tilmaamaha ku saabsan sida aad u soo dejisanayso abb-ka aanad u galayso. Shaqaale tiro yar oo ka magacaaban shirkadda ESRI (shirkadda maamusha abb-ka raadraacidda ArcGIS) ayaa weliba eegi kara xogtaada bogga isticmaalaha iyadoo ujeeddada keliya ee laga leeyahay ay tahay in kooxda daraasadda UCL laga taageero dhisidda ama abuuridda akownkaaga abb-ka raadraacidda. Marka aad bilowdo in aad abb-ka isticmaasho xogtaada goobta la joogo waxaa laga gudbin doonaa telefoonkaaga waxaana loo gudbin doonaa kaydiye xiran oo ay leedahay shirkadda EU Amazon 3dii maalinba mar waxaana markaa laga masaxi doonaa ama laga baabi'in doonaa telefoonkaaga. Xogtaada waxaa lagu kaydin doonaa kaydiyaha xiran eeshirkadda EU Amazon muddo aanan ka badnayn soddon maalmood, oo kooxda daraasadda UCL ayaa xogtaada si joogto ah ugu soo dejin doona Hoygooda Nabadda Xogta (Data Safe Haven) ee xiran halkaasoo loogu yeeli doono magaac been been ah iyadoo aragga ama isticmaalka si adag loogu

xadayn doono cilmibaareyaasha magacaaban. Xogtaada goobta la joogo waxaa baari doona ama falanqayn doona oo keliya cilmibaareyaal takhasus badan oo ka socda UCL iyo shaqaalaha ka magacaaban shirkadda ESRI oo aanan arki karin macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed. Xogta looma isticmaali doono ujeeddooyin aanan ahayn cilmibaarista ku saabsan gudbinta ama faafinta caabuqyada neefsashada.

https://www.esriuk.com/en-gb/arcgis/products/tracker-for-arcgis/overview

https://trust.arcgis.com/en/

**Muddo intee leeg ayay daraasadda Ilaalada Fayrusku socon doontaa?**

Daraasaddani waxay socon doontaa ilaa guga sanadka xiga (2021).

**Waad ku mahadsan tahay inta aad akhrisatay Qaybta 1.**

**Qaybta xigta waxaa ku qeexan Su'aalaha Badi La Is Weydiiyo.**

**Xaashida Macluumaadka Ka qaybqaataha Qaangaarka ah Qaybta 2**

## Su'aalaha Badi La Is Weydiiyo

- **Yaa qabanaya daraasadda?** Waxaa maalgeliyey Golaha Cilmibaarista Caafimaadeed (Medical Research Council) iyo Machadka Qaran ee Cilmibaarista Caafimaadka (National Institute of Health Research). Kafaala qaadaha daraasaddu waa UCL. UCL ayaa xogta maamusha (ka dhigan in ay iska leedahay oo ay masuul ka tahay dhammaan xogta lagu soo saaro daraasaddan). Waxaa tan ka mid ah sahaminnada, xogta raadraacidda goobta la joogo iyo muunadaha shaybaarka, xogta shaybaarka iyo xogta diiwaannada caafimaadeed ee ku xiran.

- **Yaa daraasadda dib u eegay?** Ka hor inta aanan cilmibaaris la qaban karin waa in ay dib u eegaan Guddiga Anshaxa (Ethics Committee), waxay hubiyaan in daraasadda si fiican loo qorsheeyey oo ay caddaali u tahay dadka ka qayb qaadanaya. Waxay ka eegaan dhanka dadweynaha waxayna hubiyaan in cilmibaareyaashu ay raaceen xeerasha iyo shuruucda habboon. Maadaama ay tani tahay daraasad qaran waxaa iyada dib u eegay oo ansixiyey Guddiga Anshaxa Cilmibaarista Hampstead (Hampstead Research Ethics Committee)– 20/HRA/2320

- **Maxaa aniga la ii doortay?** Kooxda daraasadda waxaa loo baahan yahay in lagu daro dad nooc walba iskugu jira. Daraasaddan waxaa laga qabanayaa dhammaan 9ka gobol ee ku kala jira England iyo Wales. Magacaaga si aanan kalasooc lahayn ama bakhtiyaa nasiib ah ayaa looga soo doortay liiska booskoodyada gobolkaaga. Waxaan annagu rabnaa in dhammaan dadka reerkaaga ka mid ahi ay ka qayb qaataan.

- **Miyay aniga waajib ama khasab igu tahay in aan ka qayb qaato?** Maya. Adiga ayaa go'aansanaya haddii aad ka qayb qaadanayso iyo haddii kale. Waxaan fahansan nahay in dadka qaarkood aanay rabin in ay daraasaddan ka qayb galaan.

- **Maxaa loogu baahan yahay in dhammaan dadka aqalka jooga ay ka qayb qaataan?** Tani waa muhiim maxaa yeelay waxaan u baahan nahay in aan eegno sida cudurka COVID-19 iyo fayrusyada kalee neefsashadu ay ugu kala faafaan dadka aqalka jooga.

- **Maxaa dhacaya haddii aanan anigu dhibaato ka qabin laakiin qof kaloo aqalka jooga uusan rabin in uu sameeyo?** Nasiib darro waxaa ah in aan u baahan nahay reeraha dhammaantood, markaa adiga kuuma suurtogeli doonto in aad ka qayb qaadato.

- **Maxaa dhacaya haddii aan anigu keligay meel ku noolahay?** Weli waad ka qayb qaadan kartaa.

- **Maxaa dhacaya haddii in ka badan 6 qof ay reerkayga ku nool yihiin?** Nasiib darro waxaa ah in aadan ka qayb qaadan karin. Qiyaasta reerka ee ugu badan ee daraasaddan loo oggol yahay waa lix. Reerka waxaa looga jeeda koox dad (oo aanay muhiim ahayn in ay wax isku yihiin) oo wadaaga jiko, ama qol fadhi, ama goob cunto isku mid ah, oo caadi ahaan deggan (4 maalmood/toddobaad ama in ka badan) cinwaan isku mid ah.

- **Maxaan anigu ugu baahan ahay in aan internet ku haysto guriga ama telefoon caaqil ah?** Soo gurista macluumaadka inta ugu badan waxaan ku samaynaa sahaminno amni leh oo internetka lagu buuxiyo kuwaasoo iimayl loogu soo diri doono qofka qaangaarka ah ee reerka u magacaaban (Hoggaamiyaha Reerka). Waxay tani annaga noo suurtogelin doontaa in waxa dhacaya aan ku ogaanno “waqtigeeda dhabta ah/si toos ah” waxayna ka fududdahay oo ay ka waxtar badan tahay isticmaalidda xogwaraysiyada waraaqaha ku salaysan. Xogwaraysiyada waxaa lagu buuxin karaa telefoon caaqil ah laakiin waxaa ka fududaan karta in lagu buuxiyo kumbiyuutar.

- **Maxaa dhacaya haddii aan khad internet ku haysto shaqada laakiin aanan ku haysanin guriga?** Waxaan u baahan doonnaa in aan macluumaad adiga kaa gurno marka aad bugto ama jirran tahay ee aadan shaqada joogin. Taas awgeed ayaad ugu baahan tahay khad internet oo aad ku haysato guriga ama telefoonka gacanta.

- **Maxaa dhacaya haddii aan uur leeyahay?** Waxaan annagu rajaynaynaa in aan daraasaddan ku darno dad uur leh.

- **Maxaa dhacaya haddii aan u arko in aan hore u qaaday cudurka COVID-19?** Weli waad ka qayb qaadan kartaa. Waxaan annagu raadinaynaa muddada uu socdo difaaca dabiiciga ah ee laga qabo cudurka COVID-19 iyo sida ay u faafaan fayrusyada kalee neefsashadu.

- **Ka qaybgalidda daraasaddu miyay iga caawin doontaa in aan si ka dhakhso badan u helo baaritaanka cudurka COVID-19 ama tallaalka cudurka COVID-19?** Maya – Daraasaddani dhinacna kama saamayn doonto daawayntaada caafimaadeed. Haddii aad doorato in aad ka qayb qaadato, waxaa laguu soo dooran karaa in aad annaga noo soo dirto muunadaha ama qaybaha lagu soo qaado suufka la mariyo sanka/cunaha marka aad bugto oo lagaa qaado 2 muunad dhiig. Suufafka waxaa laga baari doonaa dhammaan noocyada kaladuwan ee fayrusyada neefsashada ee fidaya xataa cudurka COVID-19 waxaana muunaddaada ama qaybtaada dhiigga laga baari doonaa unugyada difaaca jirka ee ku toosan fayrusyadan. Natiijooyinka baaritaannadan waa laguu soo sheegi doonaa iyadoo laguu soo raaciyo talo ku saabsan waxa ay natiijooyinkani ka dhigan yihiin.

- **Maxaa dhacaya haddii aan fasax u baxo?** Haddii aad fasax ku maqan tahay, fadlan sida ugu fiican ee suurogal kuu ah u sii wad buuxinta sahaminnadaada.

- **Miyaa sir lagu hayn doonaa ka qaybqaadashadayda daraasadda?** Haa. Dhammaan macluumaadka aad geliso sahaminnadayada waxaa toos loo gelin doonaa kumbiyuutarrada xiran ee UCL (Hoyga Nabadda Xogta). Aragga ama isticmaalka xogta shakhsi ahaaneed ee loo isticmaali karo si loo soo ogaado cidda aad adigu tahay waxaa si adag loogu xadayn doonaa oo uu u furnaan doonaa oo keliya dad tiro yar oo ka mid ah cilmibaareyaasha tababbaran ee UCL. Macluumaadka dadka lagu garto (sida lambarrada adeegga NHS iyo magaacda) waxaa lagu hayaa kayd xog gooni ah, oo ka durugsan xogta ku saabsan caafimaadkaaga, natiijooyinkaaga baaritaanka, ama macluumaadka kale ee lagu soo guro sahaminta. Dhammaan shaqaalaha ka shaqaynaya mashruucan waxaa sharci ahaan waajib ku ah sir ilaalin ay ku dhawraan macluumaadka shakhsi ahaaneed ee ku saabsan shakhsiyaadka. Dhammaan shaqaalaha ku shaqaynaya xogta waxaa si gaar ah looga tababbaray sida xogta loogu ilaaliyo sirta iyo amniga.

  Macluumaadka oo dhan waxaa lagu soo guri doonaa oo lagu kaydin doonaa hab waafaqsan shuruucda dhawrista xogta. Siyaasadda UCL waxay tahay in xogta la kaydiyo ugu yaraan 10 sano. **Haddii reerkaaga laga marti qaado in uu ka qayb qaato Daraasadaha 3 iyo 4**, waxaan annagu u baahan karnaa in aan dad kale la wadaagno qaar ka mid ah macluumaadka adiga kugu saabsan. Macluumaadkan waxaa ka mid ah magacaaga, cinwaankaaga, taariikhdaada dhalashada, jinsigaaga, lambarkaaga telefoonka gacanta iyo iimaylkaaga. Shaybaarka Health Services Laboratories ayaa macluumaadkan u baahan si ay ugu suurtogasho in ay ogaadaan oo ay baaraan muunadaha ama qaybaha adiga lagaa qaado oo ay dib kuugu soo diraan natiijooyinkaaga baaritaanka. Kalkaaliyeyaasha caafimaadka cilmibaarista adeegga NHS/shirkadda dhiigga qaadda ee khaas ahaan loo leeyahay ayaa macluumaadkan u baahan doona si ay u qorsheeyaan ballamaha lagu qaado dhiigga waxaana macluumaadkan u baahan doonta shirkadda xammuulka si ay iskugu ururiso oo ay boostada reerkaaga ugu soo dirto baakadka qalabka daraasadda. Haddii aad ka qayb qaadato daraasadda raadraacidda dhaqdhaqaaqyada kooxda daraasadda UCL ayaa u baahan kara in ay magacaaga iyo cinwaankaaga iimayl la wadaagaan shaqaale tiro yar oo ka magacaaban shirkadda ESRI oo kooxda daraasadda UCL ka caawin doona dhisidda ama abuurista akownkaaga abb-ka raadraacidda.

- **Waa maxay macluumaadka aad ka eegi doontaan aanad ka falanqayn doontaan abb-ka raadraacidda dhaqdhaqaaqyada ee ArcGIS?**
  Macluumaadka aan dan ka leenahay in aan falanqayno ama baarno waxaa ka mid ah qiyaasta waqtiga maalintii la soo joogo goobaha soo socda iyo sida ay u saadaalin karaan halista caabuqa. Tafaariiqa (xarumaha dukaannada, dukaannada waaweyn, dukaannada, suuqyada), Madaddaalada (matalan masraxyada, shaneemooyinka), Goobaha cawayska (matalan baarasha), Goobaha cuntada iyo cabbitaanka (makhaayadaha yar makhaayadaha waaweyn), Shaqada, Guriga, Gaadiidka dadweynaha, Socodka, orodka, baaskiil

wadista, Xadiiqooyinka, Garoonnada sboortiga ama Goobaha bandhigyada muusikeed, iyo Meelaha dalxiiska.

**Ogaysiinta Sirta Dhawrista Xogta Kooban:**
Waxaa mashruucan maamule u noqon doonta jaamacadda University College London (UCL). Sarkaalka Dhawrista Xogta (Data Protection Officer) ee UCL ayaa kormeeraya ama dusha ka ilaalinaya waxqabadyada UCL ee ay ka mid tahay ka shaqaynta xogta shakhsi ahaaneed, waxaana lagala xiriiri karaa halkan dataprotection@ucl.ac.uk
Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida UCL ay u isticmaasho macluumaadka ka qaybqaateyaasha ee dadka ka qayb qaata daraasadaha cilmibaarista caafimaadka iyo daryeelka, guji https://www.ucl.ac.uk/legal-services/privacy/ucl-general-privacy-notice-participants-and-researchers-health-and-care-research-studies

Macluumaadka loo baahan yahay in ka qaybqaateyaasha lagu siiyo shuruucda dhawrista xogta (GDPR iyo DPA 2018) waxaa lagu bixiyaa ogaysiimaha sirta ee 'kooban' iyo 'guud' labadoodaba. Rukhsadda sharciyeed ee dhanka UCL laga adeegsado si looga shaqeeyo xogta shakhsi ahaaneed ee daraasaddan waxay soo hoos gashaa Qodobka 6(1)(e) "hawsha shacabka" iyo Qodobka 9(2)j "ka shaqaynta waxaa loogu baahan yahay ujeeddooyinka xasuus dhigga ee dan u ah shacabka, ujeeddooyinka cilmibaarista sayniska ama taariikhda ama ujeeddooyinka tirakoobka". Xogtaada shakhsi ahaaneed waxaa laga shaqayn doonaa waqtiga ama inta loogu baahan yahay mashruuca cilmibaarista. Haddii aan annagu magaca ka saari karno ama magac been been ah u yeeli karno xogta shakhsi ahaaneed ee aad bixiso tan waan fulin doonnaa, waxaanan ku dadaali doonnaa in aan sida ugu yar uga shaqayno xogta shakhsi ahaaneed mar kastoo suurogal ah.

Haddii aad ka walaac qabto sida looga shaqeeyo xogtaada shakhsi ahaaneed, ama haddii aad rabto in aad annaga nagala soo xiriirto xuquuqdaada, fadlan marka hore UCL kala soo xiriir halkan data-protection@ucl.ac.uk. Haddii aadan weli qanacsanayn, waxaa kuu furan in aad la xiriirto Xafiiska Xubinguddiga Macluumaadka (Information Commissioner's Office) (ICO) (https://ico.org.uk/concerns/handling/).

## Waa maxay xulashooyinka adiga diyaar kaaga ah sida macluumaadkaaga loo isticmaalo?

- Waxaad waqti kaste joojin kartaa ka qaybqaadashada daraasadda, adigoo aanan sabab bixinayn, laakiin waxaan hayn doonnaa macluumaadka adiga kugu saabsan ee aan hore kaaga qaadnay.
- Haddii aad doorato in aad joojiso ka qaybqaadashada daraasadda, waxaan rabnaa in aan sii wadno in aan macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga ka soo gurno diiwaannada dhexe ee ururka NHS Digital. Haddii aadan rabin in tan la sameeyo, noo soo sheeg waanan joojin doonnaa.
- Waxaan annagu u baahan nahay in aan habab gaar ah ku maamulno diiwaannadaada si cilmibaarista loogu kalsoonaan karo. Waxay tani ka dhigan

tahay in aanan annagu adiga kuu oggolaan karin in aad aragto ama wax ka beddesho xogta aan adiga kaa hayno.
- Haddii aad oggolaato in aad daraasaddan ka qayb qaadato, waxaad fursad u yeelan doontaa in aad ka qayb qaadato cilmibaarista mustaqbalka oo loo isticmaali doono xogtaada lagu kaydiyey daraasaddan.

**Halkee ayaad ka heli kartaa war dheeraad ah oo ku saabsan sida macluumaadkaaga loo isticmaalo?**

War dheeraad ah oo ku saabsan sida aan annagu macluumaadkaaga u isticmaalno waxaad ka heli kartaa

- halkan www.hra.nhs.uk/information-about-patients/
- bartayada internetka daraasadda www.ucl-virus-watch.net
- marka aad weydiiso qof ka mid ah kooxda cilmibaarista
- marka aad iimayl u dirto maamulaha daraasadda (study manager) **viruswatch@ucl.ac.uk**

- **Maxaa dhacaya haddii aan go'aankayga beddelo oo aan ka noqdo ka qaybqaadashada?** Waxaad xor u tahay in aad marxalad kaste kaga baxdo daraasadda.

- **Ka qaybqaadashadu ma leedahay haliso ama khasaare?** Ma jiraan haliso waaweyn. Dadka qaarkood ayaa dhibaataysan kara buuxinta xogwaraysiyada – waxaan annagu isku daynay in aan kuwan fududayno inta suurogalka ah. Suufafka la mariyo sanka & cunaha raaxo darro ma leh ayaa la dhihi karaa inkastoo dadka qaarkood ay ku yara margan karaan. Qaadista muunaddaada dhiiggu waxay yeelan kartaa raaxo darro ugu yar waxayna dadka qaarkood ku reebi kartaa nabar yar. Waxaan isticmaali doonnaa xirfadleyaal daryeel caafimaad oo khibrad leh si aan dhiigga kaaga qaadno.

- **Waa maxay faa'iidooyinka suurogalka ah ee ku jira ka qaybqaadashada?** Annagu kuma ballanqaadi karno in daraaaddu ay adiga shakhsi ahaan kuu faa'iidayn doonto laakiin macluumaadka aan helno waxay daruuri u noqon doonaan qorshaynta sida wax looga qabto cudurka COVID-19 ee hadda iyo cudurrada safmarka ee mustaqbalka. Haddii aad qayb ka noqoto daraasaddayada suuf marinta, waxaan adiga kuu sheegi doonnaa haddii aad qaadday caabuqa COVID-19. Haddii aad bixiso muunado ama qaybo dhiig waxaan kuu sheegi doonnaa natiijooyinka baaritaannada unugyada difaaca jirka ee cudurka COVID-19.

- **Maxaa dhacaya marka daraasadda cilmibaarista la joojiyo?** Waxaan kuu soo sheegi doonnaa waxa daraasadda lagu soo helay.

- **Maxaa dhacaya haddii aan weli su'aalo qabo?** Fadlan su'aalaha kale ee aad qabto iimayl ugu dir **viruswatch@ucl.ac.uk**.

- **Maxaa dhacaya haddii aanan ku faraxsanayn sida loo qabto daraasadda?** Waxaan annagu isku daynay in aan daraasadda inta suurogalka ah u fududayno dadka ka qayb qaadanaya, haddii aad cabasho ka qabto habka adiga laguula dhaqmay tan wax ayaa laga qaban doonaa. Haddii aad rabto in aad ka cabato qabashada ama hawlgalka daraasadda fadlan la xiriir maamulaha daraasadda, oo aad ka helayso halkan UCL Department of Epidemiology & Public Health (Waaxda Baarista cudurrada safmarka & Caafimaadka Dadweynaha ee UCL), 1-19 Torrington Pl, Fitzrovia, London WC1E 7HB ama iimayl u dir viruswatch@ucl.ac.uk. Haddii aadan weli faraxsanayn waxaad cabashadaada u qaadi kartaa Guddiga Anshaxa UCL oo aad kala xiriiri karto halkan: ethics@ucl.ac.uk oo nuqul uga dir research-incidents@ucl.ac.uk.


- **Waxyeellada:** Iyadoo aanan la filanayn haddii ay dhacdo in uu dhaawac kaaga yimaaddo ka qaybqaadashada, magdhaw ayaa lagu siin karaa laakiin waxaa waajib kugu noqon karta in aad bixiso kharashkaaga sharciyeed. Haddii aad ku tuhunsan tahay in dhaawacu uu ka yimid dayacaadda ama taxaddar la'aanta Kafaala qaadaha (University College London), markaa waxaa adiga kuu suurtogeli karta in aad magdhaw dalbato. Fadlan dalbashada ama dacwadda qoraal ugu dir Professor Andrew Hayward oo ah Baaraha Ugu sarreeya (Chief Investigator) ee tijaabada caafimaadeed/ daraasadda waxuuna joogaa halkan UCL 1-19 Torrington Place. Baaraha Ugu sarreeya ayaa markaa dalbashada u gudbin doona Kafaala qaadaha ka dibna Shirkadda caymiska Kafaala qaadaha. Weliba, qaababka cabashooyinka Adeegga Caafimaadka Qaran (National Health Service) ee caadiga ah ayaa weli adiga diyaar kuu ahaan doona (marka habboon).

- **Maxaa lagu samayn doonaa natiijooyinka daraasadda cilmibaarista ka soo baxa?** Natiijooyinka baaritaanka cudurka COVID-19 ee laga helo muunadaha aad annaga noo soo dirtay adiga ayaa dib laguugu soo celin doonaa. Waxaan weliba rabnaa in aan adiga kula socodsiinno natiijooyinka daraasaddayada oo aan kuugu soo dirno warside joogto ah. Natiijooyinka daraasadda waxaa lala wadaagi doonaa kooxaha jawaabcelinta cudurka COVID-19 ee adeegga NHS iyo Caafimaadka Dadweynaha England si ay u qorsheeyaan jawaabcelinta hadda iyo mustaqbalka laga bixiyo cudurrada safmarka. Waxaan weliba falanqaymaha natiijooyinka daraasadda dadweynaha toddobaad walba u soo bandhigi doonnaa muddada daraasadda waxaanan ka muujin doonnaa fagaare internet oo lagu hayo ESRI ArcGIS. Natiijooyinka daraasadda waxaa lagu daabici doonaa wargeysyada cilmisayniska waxaana lagu soo bandhigi doonaa kulannada cilmisayniska. Adiga lagaama garan karo mid ka mid ah daabacaadyadan ama barahan internetka.


- **Sidee ayaan anigu u dooran karaa qaybta qaabka jirkayga?** Haddii aadan garanayn dhererkaaga iyo culayskaaga oo aadan haysanin cabbire iyo misaan

waxaad qaabka jirkaaga ka dooran kartaa shaxda hoose.  Fadlan tan qoro maxaa yeelay waxaad ugu baahan doontaa sahaminta salka aasaasiga ah.

**Qaabkee ayaa adiga kuugu dhow? Ragga**




**Qaabkee ayaa adiga kuugu dhow? Dumarka**




**Waad ku mahadsan tahay tixgelinta ka qaybqaadashada Ilaalada Fayruska.**